

## WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA DARYEELKA CAAFIMAADKA?



**Helitaanka iyo la xiriirka** fudud ee kooxdaada daryeelka assaasiga ah si aad u weydiiso su'aalo ama caawimaad u heshid.



Adiga, qoyskaaga, kooxdaada daryeelka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee kale ayaa **wada shaqeynaya** si loo horumariyo iyo loo ilaaliyo caafimaadkaaga.



Kooxdaada daryeelkaaga waxaa ka mid ah **iskuduwe** si uu kugu caawiyo qabanqaabinta qorshe daryeel oo shakhsiyeesan, gudaha iyo dibadda xarunta caafimaadka, iyo inuu kaa caawiyo sidii aad u gaari lahayd hadafyadaada/yoolalkaaga.



Waxaad la shaqayn kooxdaada daryeelka si aad u abuurto **qorshe daryeel shakhsiyeesan** oo ay heli karaan adiga iyo dhammaan bixiyeyaashaada daryeelka caafimaadka.



Waxaad helayso **daryeel buuxa** laga bilaabo ka hortagga cudurka ilaa maareynta xaaladaha adag iyo kuwa joogtada ah.



Ixtiraamka luqadda, dhaqanka iyo aaminaada diinta. Guryaha daryeelka caafimaadka waa mid loogu talagalay **qof kasta**.



Waan kula shaqayneynaa si aan u xayeysiino nolol **caafimaad leh** si aad u awoodo inaad ku raaxaysato caafimaad wanaagsan.

## YA KU JIRA KOOXDA GURIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

**Adiga.** Oo ah Bukaana ahaan, waxaad tahay xubna ugu muhiimsan ee kooxda daryeelka. Baahidaada iyo yoolalkaaga/hadafyadaada ayaa muhiimada hore leh.

**Qoyskaaga.** Bukaannada inta badan, xubnaha qoyska ayaa loo baahan yahay si ay u taageeraan daryeelkooda.

**Bixiyahaaga.** Dhakhtarkaaga, kalkaaliyahaaga caafimaadka, ama kalkaaliyaha dhakhtarkaaga ayaa ah shaqo-wadaagaaga daryeelka si uu kuu siiyo macluumaad, dhageysto baahidaada, iyo kaa caawiyo samayta xulashada maskaxda leh si aad u wanaajiso iyo u ilaaliso caafimaadkaaga.

**Iskuduwaha daryeelkaaga.** Isu-duwaha daryeelkaaga wuxuu qabanqaabiyaa daryeelka iyo adeegyada aad ku hesho gudaha iyo dibadda xarunta caafimaadka. Tani waa qofka ugu horeeya ee aad waceyso haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad. Isuduwaha daryeelkaaga ayaa ku hayn doona qorshahaaga daryeelka sida ugu dambaysay iyo kugu taageeri doonaa inaad gaarto hadafyadaada/yoolalkaaga caafimaad.

**Bixiyayaasha daryeelka ee kale.** Iyada oo ay ku xiran tahay baahidaada, xirfadlayaal caafimaadeed ee kale ee gudaha iyo dibadda xarunta caafimaadka ayaa laga yaaba in lagu daro kooxda daryeelka. Tusaale ahaan, shaqaalaha caafimaadka bulshada, dhakhtarka ilkaha, farmashiistaha, ama xirfadlaha caafimaadka maskaxda ayaa laga yaabaa inay ka qayb noqdaan kooxda daryeelka.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ee guryaha daryeelka caafimaadka ee Minnesota, wac **651.201.5421** ama e-mail-garey **health.healthcarehomes@state.mn.us** ama booqo barteena internetka ee **www.health.state.mn.us/facilities/hchomes**



*Dib u Qeexida Caafimaadka.  
Dib u Naqshadeynta Daryeelka.*



Macluumaadka bug-yarahan ku yaala waxaa bixiyey  
Waxda Caafimaadka ee Minnesota.



## SIDEE BUU DARYEELKA UUGA DUWAN YAHAY GURIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

“Kooxda daryeelka ayaa sharraxaya xaaladdaheya, kadibna waxaynu ka wada hadleynaa waxa ugu fiican ee ah inaan sameeyo. Waxaan dareemayaa inaan ka qayb ahay go’aankaas. Waxaan heystaa hadafyo/yoolal, waxayna igu dhiirigeliyaan wax walba oo dhan.” – **BUKAAN**

“Isku-duwaha daryeelkeyga ayaa iga caawiya inaan xasuusto waxa uu dhakhtarkayga ii sheego inaan sameeyo. Waxaan heystaa qof aan waco markaan u baahdo caawimaad.” – **BUKAAN**

“Isku duwayaasha daryeelka waa kaaga dhaxeeya wicitaan talefoon kaliya. Tani waa waxa ugu weyn ee ay ku qancaan iyo raaxeystaan bukaanada.” – **ISKUDUWE DARYEEL**

“Waxaan u sameynaa/jadwaleena ballamo si filan u kala fog si aan u awoodo inaan barto bukaanadeyda si shaqsi ahaan. Aniga oo dhegeysta bukaanka oo waydiiya waxa ay rabaan, mararka qaarkood aad ayaan u yaabay.” – **DHAKHTAR**

“Dhamaanteen waan wada shaqeynaa – rugta caafimaadka ee kale ee deegaanka, caafimaadka dadweynaha, adeegyada bulshada, farmashiyaha, caafimaadka dabeecadda iyo dhammaan bixiyayaasha la xiriira ee magaalada. Waxaan u wada shaqeynaa sidii aan u siin lahayn bukaanadeena iyo magaalada aan ku noolnahay daryeelka sida ugu suurta galka ah ugu fiican.” – **MAAMULE**

“Kooxda daryeelkeyga waa koox aad u wanaagsan iyo si buuxda ayay u bedeshay noloshayda. Sonkorteyda/macaankeyga aad bay faraha uga baxsaneed, laakiinse daryeelkooda daraadii, A1C-gayga hoos ayuu u dhacay. Dareenka sidan u wanaagsan sanado ma dareemin.” – **BUKAAN**

## WAA MAXAY GURIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

URugta daryeelka aasaasiga ama dhakhtarka caafimaadka ee ka heysta shahaado xaqiijin Waaxda Caafimaadka ee Minnesota si uu isugu duwo daryeelka dhexda kooxda daryeelka assaasiga, takhasusayaasha iyo adeeyada bulshada si loo hubiyo in bukaannada ay helayaan waxa ay u baahan yihiin si ay u ahaadaan dad caafimaad qaba iyo ay horumariyaan oo maareeyaan caafimaadkooda.

Guryaha Daryeelka Caafimaadka waxay bixiyaan daryeel buuxa oo laga bilaabo ka hortagga cudurrada illaa iyo maareynta xaaladdaha adag iyo kuwa joogtada ah, iyo waxay u heegan yihiin inay buuxiyaan heerarka ugu sarreeya ee bixinta daryeelka caafimaadka.

## MAXAAD U DOORANAYSAA GURIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

- Daryeelka Fiyownaanta, Jirka, Dareenka iyo Bulshada
- Caafimaadka bukaanka, Qoysaska iyo Bulshada
- Diira saarka Ka Hortagga Cudurrada iyo Fayow-qabka
- Wadashaqeynta Bixiyaha iyo Bukaanka
- Loo Dhan Yahay oo Loo Siman Yahay



**EEO CALAAMADAN AMA KA HEL GURI DARYEEL CAAMFIMAAD EE SHAHAADEYSAN EE KUU DHAW BARTA INTERNET:**  
[www.health.state.mn.us/facilities/hchomes](http://www.health.state.mn.us/facilities/hchomes)